

Suuxinta guud:

Khataraha iyo Saamaynta

Dad isku mid ma ahan sidoo kalana macquul ma ahan in la ogaado cida dareemi doonta saamaynta xun ama khatarta. Qaar ka mid ah dadka waxaa laga yaabaa inay u ku jiraan kuwo leh xaalado caafimaad oo hore u jiray ama u baahan yihiin qaliinno gaar ah.







Lambarada hoose waa celcelisyada cilmi baarisyada. Dadka cilmi baarista waxay inta badan mari jireen qalliin joogto ah, waxayna ahaayeen kuwo caafimaad qabo sidoo kalena aan lahayn wax xaalado caafimaad ah.









Halkan ayaad ka heli kartaa cilmi baaristaan isticmaalnay: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/evidence.

Khatarahaagu way ka sarayn karaan wayna ka hoosayn karaan kuwa lambaradaan. Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doono khataraha ay aaminsan yihiin, inay kuugu daran yihiin.

Waxaad website-keena ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noocyada kala duwan ee suuxdinta oo luuqado kala duwan ku qoran halkan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages.






Lambaradaani waa kuwo laga soo qaaday 100 qof ee kasta.

Maxaa dhacay?	Intee muddo le eg?	Meeqa? Laga soo qaaday 100 qof ee kasta (boqol qof)
 Qarqaryo/Dhaxan	Mudo udhaxaysa 20 ilaa 30 daqiiqo qolka soo kabashada	 15 ayaa dhaxamooday 85-na ma dhaxamoon
 Lalabo (xanuun dareemaya)	mudo udhaxaysa 1 ilaa 24 saacadood	 kudhawaad 15 ayaa lalabooday kuwo dhawaad 85 ma lalaboon
 Dhuun xanuun	24 ilaa 48 saacadood	 20 ilaa 40 cunuhu xanuunay 60 ilaa 80-na cunuhu xanuunin <p>Waxay ku xiran tahay nooca tuubada neefsashada la isticmaalay</p>




	Haaro ama xanuun uu keenay duriinku.	waxay ku baaba'yaan maalmo yar gudahood		10 ayaa haaro yeeshay/xanuun dareemay	90-na haaro mayeelan/xanuun ma dareemin
	Dhaawac yar oo bishinta ama carabka ah	wuxuu ku bogsanayaa maalmo yar		1 ilaa 5 dhaawacmay	95 ilaa 99-na ma dhaawacmin
	Caabuqa xabadka	maalmo ama asbuucyo		20 ayaa wareeray	80-na ma wareerin
	Maskax wareer (jahwareer xad dhaaf ah)	maalmo, asbuucyo ama bilo ah		10 ilaa 50 ayaa sameeyey	50 ilaa 90 ayaan samayn

khatarahan hoose waa kuwo naadir ah.

Lambaradaani waxaa laga soo qaatay 10,000 ee qof ee kasta.

Maxaa dhacay?	Intee muddo le eg?	Meeqa? Laga soo qaaday 10,000 ee qof (toban kun oo qof)
 Dhaawaca ilkaha	Ubaahan inuu dhakhtarka ilkaha arko	5 ayaa ubaahday 9,995 uma baahan
 Arag cawaran, indho cuncun ama indho xanuun oo ay ugu wacan tahay xagtin yar ama indho qalayl ah.	Dhowr maalmood	ku dhawaad 5 ayaa cawar, cuncun ama xanuun dareemay ku dhawaad 9,995 waxba ma dareemin
 Gariir yar, kabuubyo, xanuun ama tabar darro (dhaawaca neerfaha).	Mudo yar (asbuucyo ilaa bilo) Joogto ah	1 ilaa 5 dhaawacmay 9,995 ilaa 9,999 ayaan samayn 1 ayaa sameeyey 9,999 ayaan samayn
 Alerji aad u daran (anaphylaxis)	Dagdagna udhaca Isla markiiba la daaweeyey	1 ayaa sameeyey 9,999 ayaan samayn
 Wadna istaag, sida wadnaha oo joogsaday inta qaliinka lagu guda jirey	Isla markiiba la daaweeyey	3 ayaa wadnuhu istaagay 9,997-na ma istaagin

Lambaradaani waxaa laga soo qaatay 100,000 ee qof ee kasta.

Maxaa dhacay?	Meeqa? Laga soo qaaday 100,000 oo qof (boqol kun oo qof)	
 <p>Waqti yar soo toosay inta lagu guda jirey suuxinta guud (wacyiga shilalka)</p>	<p>5 ayaa soo toosay</p> <p>3-4 qof oo ka mid ah 100,000 ayaa sheegay in ay socotay wax ka yar shan daqiiqo, ka hor inta aan qalliin la samayn ama kadib markii uu dhamaaday.</p> <p>Qiyaastii 100,000 hal ayaa yiri xanuun baan dareemay.</p>	<p>99,995 ma soo toosin</p>
 <p>Aragii ka dhumay(indho beelay) iyadoo ugu wacan tahay cadaadis ama xinjirowga dhiiga ee xiray neefraha opti-ga.</p>	<p>1 ayaa sameeyey</p>	<p>99,999 ayaan samayn</p>
 <p>Udhintay dhibaatooyinkii qalliinka ka dhashay Udhintay wadno istaag dhacay intii lagu guda jirey qalliinka ama kadib qalliinka Udhintay suuxdinta awgeed Khatartaan waa kala duwan tahay. Tusaale ahaan, qalliimada qaar way badan tahay, ama haddii dadku yihiin kuwo nugul, waawayn ama leh xaalado caafimaad oo gooniya.</p>	<p>14 ayaa udhintay</p> <p>1 ayaa sameeyey</p> <p>1 ayaa sameeyey</p>	<p>99,986 uma dhiman</p> <p>99,999 ayaan samayn</p> <p>99,999 ayaan samayn</p>

Afeef

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda ah, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Ma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad muhiim kuugu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buuggan yar oo keligiis ah waa inaan loola qaadan sidii talo. loomana isticmaali karo ujeedo ganacsi ahaaneed. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (bulshada turjubaanada ee Turjubaanada bilaa xuduudaah'.) Tayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

www.rcoa.ac.uk

patientinformation@rcoa.ac.uk

© 2024 Royal College of Anaesthetists (RCoA)

Macluumaadkan waxaa lagu nuqulan karaa ujeedada soo saarista qalabka macluumaadka bukaanka. Fadlan fixraac ishan asalka ah. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah macluumaadkan ku isticmaasho daabacaad kale, waa in la bixiyaa mahadnaq ku habboon waana in laga saaraa calaamadaha, sumadaha, sawirada iyo astaamaha. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.